



Kooxda Winterhaven waxay ku guulaysteen abaalmarinta halabuurnimada horyaalka LEGO ee gobolka

Qof kasta oo yaqaan Southeast Portland-ta dhaw wuxuu ogyahay tareenka ka gudba SE 11th Avenue, halka u dhaw jidka Division Street. Koox arday ah oo ka socda dugsiga Winterhaven K-8 School ayaa wax ka qabtay dhibaatooyinka gaadiidka ee ay keenaan tareenada xammuulka ee halkaas istaaga, taasi oo noqotay mashruuc kasbaday abaalmarinta horyaalnimada LEGO ee gobolka.

Amazing Walri, oo ah koox lix ka kooban oo ardayda fasalka siddeed ah oo ka socda Winterhaven, ayaa ku guulaystay Abaalmarinta Mashruuca Halabuurka ee Cilmi-baarista ee [Intel Oregon FIRST LEGO League State Championships](#) oo dhawaan lagu qabtay dugsiga sare ee Liberty High School ee ku yaala Hillsboro. Mashruuca kooxda, oo cinwaakiisu yahay “the Crossing Conundrum,” ayaa ku guulaystay maamuusidda “lagu aqoonsanayo koox adeegsatay khayraad kala duwan si ay u qaabeeyaan fahamka qotada-dheer ee baaxadda leh ee dhibaatada.”

Xubnaha kooxdoo waxay kala yihin Eli Bates, Calvin Beall, Hunter Boyer, Jenna McComas, Frances Springgate iyo Korbin Towne. Kooxda waxa hoggaaminayey Erinn Bates, JJ Heldmann iyo Robert Towne.

Tartanka gobolku wuxuu ka koobnaa dhisidda iyo barnaamij ku shubista robot LEGO ah oo ku dhammaystiraya hawlgallada ugu badan ee suurtogal ah muddo 2½ ah. Sidoo kale, koox kasta waxa laga rabay inay aqoonsato dhibaato haysata dhisme ama barxad dadweyne oo bulshadooda ka jirta oo ay xal u keenaan. Koox kasta waa inay sameeyaan bandhig 5 daqiiqo ah oo dhibaatada kusaabsan.

Xalka Amazing Walri wuxuu ka koobnaa app darawada u sheegaya marka tareen taagan yahay jidka, iyo in calaamado iftiimaya si nidaamsan loo dhigo jidadka ku dhaw si ay uga caawiyaan darawalada inay ka dheeraad inay ciriiri galaan. Intii ay mashruuca ku hawlanaayeen, ardaydu waxay la wadaageen mashruuca xubnaha Degmada Xaafadda Hosford-Abernethy, iyo waliba lataliye hore ee xagga jidadka tareenka iyo saraakiil ka socota TriMet.

Kooxdoo waxay ugu soo baxayaan gobolka iyagoo ku guulaysta abaalmarinta Core Values Award ee ciyaar Diisambar ah oo ka dhacaysa dugsiga Catlin Gabel School. Gobolka, Amazing Walri waxay la ciyaareen 57 kooxood oo kale waxayna ku dhammaysteen kaalinta 18^{aad} ciyaarta robotka.

“Aad ayaan ugu faanayaa carruurtan,” ayey dhahday Cindi Carrell, oo ah tabobaraha kooxda robotka dugsiga sare ee Cleveland High School, Pigmice.

Amazing Walri waxay la leeyihii xiriir adag Pigmice, taasi oo la aasaasay 2004 [una tartantay Horyaalnimada Robotyada ee Adduunka kal hore](#). Qaar badan oo xubnaha Pigmice ah ayaa u taga Winterhaven, iyagoo ku bilaabay tartamayaal LEGO ah kahor intii ayna u guurin xagga robotyada. Xubnaha Pigmice waxay gacan ka gaysteen hagista Amazing Walri, waxayna martigaliyeen ciyaaro saaxiibtimo oo ay la yeesheen dhawr kooxood si ay gacan uga gaystaan isku diyaarinta gobolka.